



Farrriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Janaayo 18, 2022

Ku socota: Daryeel bixiyayaasha

Ka socota: Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: La-talin caafimaad oo furan oo lala leeyahay Ururka Qaranka ee Dadka Labada Xaaladood/Xanuun Qaba 'Dually Diagnosed'

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa kafaala qaadaya la-talin caafimaad oo furan saddexdii biloodba mar oo lala yeesho khabaro ka socota [Ururka Qaranka ee Dadka Labada Xaaladood/Xanuun Qaba 'Dually Diagnosed'](#) (NADD). Diiradda wax la saarayo ayaa ah taageerida dhallinyarada iyo qoysaska dhallinyarada qaba xaaladaha naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) iyo caafimaadka dhimirka.

Kani waa waqti wanaagsan oo shaqaalaha caafimaadka ama xirfadlayaasha kale ee la shaqeynaya dadkani ay su'aalo ku weydiiyaan oo helaan la-talin ku saabsan hababka ugu wanaagsan ee wax loo qabto. Looma baahna jawaab celin. Marka la joogo waqtiga kulanka, isticmaal halka la sii gelayo 'link' ee hoos ku taala ama soo wac si aad ugu soo biirto.

- Waqtiga: 2:30 ilaa 4 galabnimo Khamiista, Febraayo 3, 2022
- Goobta: [Meesha laga sii gelayo 'link' Microsoft Teams](#) ama <https://bit.ly/34FaAaP>
- Soo wac (maqal kaliya): +1 971-277-2343, Aqoonsiga Kulanka: 212 480 228#

ODDS kala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow [website-keena](#).

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.